

Utrecht, 25 nofeembar 2019

## XUQUUQDA KA DACWOOSHADA

Ku dhalinyarada oo dhan,

La xiriirka aad ururka la leedahey waxaad kula kulmi kartaa shaqaalayaal kala duwan oo Nidos u shaqeeya. Maamulka sarena wuxuu rajeynayaa inaad kuwa si wanaagsan u wada shaqeyn kartaa. Laakiin waxaa dhici karta inaad dareento inaan si aan wanaagsaneyn amaba xun laguula dhaqmo. Ta markaa xaqiiq ahaantii ugu fiican i waa in aad isla markaa qofka shaqaalaha ah ee taasi idin dhex martey aad si toosa ugu wada hadashaan. Haddii taasi suuroobi weydo, oo aad qof ka korreeya inaad la hadasho rabiitaa wey dhici kartaa.

Taana sida soo socota ayaad u sameyneysaa:  
Waxaad codsan kartaa wada hadal aad la yeelato muumulaha qeybta gobolka aad degan tahey.  
Haddii aadan ciwaankiisa aqoon Utrecht ayaa lagaa siin karaa haddii aad sekratariyada la xiriirto, 030 – 2391200.  
Maamulaha qeybta ayaa markaa wax ka qabadka dacwadaada bilaabaya isagoo markaa adiga iyo sida la jecelyahey, qofka shaqaalaha ah ee aad ka dacwooneysyo wadahadal idinla yeelanaya.

Haddii jawaabta maamulaha qeybtu eysan ku qancin, waxaad dacwadaada soo hor dhigi kartaa maamulaha sare/diritoorka.

Waxaad warqad ama telefoon u diri kartaa:  
Stichting Nidos  
Maliebaan 99, 3581 CH Utrecht  
Postbus 13021, 3507 LA Utrecht  
Tel: 030 – 23 91 200

Haddii taasi xitaa ey xal kuu keeni weydowaxaad markaa dacwadaada hor dhigi kartaa guddiga dacwo qaadidda. Xitaa dacwadaada si toosa ayaad guddiga dacwo qaadidda ugu gudbin kartaa. Guddiga dacwad qaadida waxay ka kooban yahay seddex qofood oo aan u shaqeyn ururka Nidos. Guddigaas kuma jiri karo qofka isaga laga dacwoonayo. Dacwadaadana waa inaad iyadoo qoraal ah sekreteriyadda guddiga dacwo qaadidda usoo gudbisaa.

Ciwaanka:

Stichting Nidos, Secretaris klachtcommissie  
Maliebaan 99, 3581 CH Utrecht  
Postbus 13021, 3507 LA Utrecht

Sida uu guddiga dacwo qaadidda dacwadaada u qaadayo ayaa ah mid loo sameeyey sharci/qoraal qaas u ah. Waxaadna qoraalkaa ka codsan kartaa xafiiska Nidos ee gobolka aad degan tahey ku yaalla.

Haddii loo baahdana waxaad talo weydiisan kartaa xafiiska sharci ka caawinta (*wetswinkel*) ama hey'adda difaaca xuquuqda caruurta (*Raad voor de Kinderbescherming*) ee agagaarkaaga ku taalla.

Ku hadlaya magaca muumulaha  
T. Klijn